

DAAWADAADA: Simvastatin ____ mg

Maxaan u qaadanayaa daawadan? Waxaad qabtaa koolastarool. Koolastaroolka sareeyaa waa halis hadii aan la daawayn. Wuxuu sababi karaa faalig iyo wadno xanuun. Waad u dhiman kartaa koolastaroolka hadii aan la daawayn.

Tilmaamaha daawada aad qaadanayso: Qaado 1 kiniin ah markaad seexanayso maalin walba. Wax cunto ah ha cunin ka hor inta aanad qaadan kiniink.

Maxaan dareemi doonaa markaan qaato daawadan? Mararka qaar waxa jirta saamayn dambe oo ka timaada marka daawada la qaato. Saamaynta dambe waa shay aad dareemi karto inay iska caadi tahay. Saamaynta qaar ka timaada qaadashada daawada Simvastatin marka jidhkaaga aanu soo isticmaali jirin waxa kamid noqon kara madax xanuun, yalaalugo, calool xanuun, calool istaag ama astaamaha durayga sida duuf badan oo sanko ah ama cuno xanuun.

Haddii aad qabtid murqo xanuun aan la garanayn ama nugayl, ama daciifnimo qandho leh, aad u daalan tahay oo aad leedahay kaadi midab cas ah, ballan ka samayso dhakhtar isla markiiba.

Saamaynta qaarkood ma dhacaan inta badan lakin waxay noqon karaan qaar halis ah. **Wac 911 ama isla markiiba aad qolka gurmada haddii aad isku aragto: finan, barar wajiga, dibnaha, carrabka ama cunaha; dhibaato neefsashada ah; ama neefta oo ku qabata.**

Maxaa kale oo aan u baahanahay inaan ogaado?

1. Waa inaad qaadataa daawadan maali kasta xataa hadii aad caadi dareemayso.
2. Waa inaad soo kordhisataa bil kasta.
3. Cab biyo badan.
4. Ha cabin aalkolo.
5. Ha cunin liin, cab dareeraha liinka la shiiday ama isticmaal waxyaabaha kale ee laga sameeyo liinta.
6. Ha isticmaalin daawadan hadii aad leedahay beer xanuun.
7. **Haddii aad leedahay uur**, jooji isticmaalka daawadan hada. Kusoo noqo xarunta caafimaad ee Grace Village Medical Clinic si aad ula kulanto dhakhtarka markaa waxa lagu raadin karaa daawo kale oo aad qaadato.
8. Hooyooyinka cusub **ma naasnuujin karaan ilmahooda intay isticmaalayaan daawan.**
9. Haddii aad booqato xafiis kale oo dhakhtar, xarun caafimaad, ama qolka gargaarka degdega ah, waa inaad u sheegtaa inaad qabto xanuunka koolastaroolka oo aad qaadato daawada Simvastatin.

“Macluumaadka ku jira halkan waxa loogu talo galay kaliya ujeedooyin macluumaad loomana qaadan karo talo khubaro caafimaad ahaan. Markasta weydii talada dhakhtarkaaga ama adeeg bixiye daryeel caafimaad oo ku haboon wixii su’aalo aad ka qabtid xaalad caafimaad ama daaweyn.”